


OCTOBER 2008

			1	2	3	4
5	6	7	8	9	10	11
12	13		Talaadadan, Codkaaga dhiibo			

Doorasho guud oo federaalka ah ayaa dhici doonta 14-ka Oktoobar, 2008.



Wixii macluumaad ah ee ku saabsan meesha laga codeynaayo iyo waqtiga la codeynaayo, ka eeg kaarkaaga macluumaadka codbixiyaha. Waxa uu kuu sheegayaa halka aad ka codeyn doontid iyo waqtiga aad codeyn doontid. Si dhakhso leh ayaaad uga gudbi doontaa hawsha codeynta haddii aad heysato kaarka codeynta.

Saacadaha laga codeynaayo meelaha loogu talo galay codbixinta xaafadda aad deggan tahay waxa aad ka heli doontaa oy ku qoran yihiin Kaarkaaga Macluumaadka Codbixinta ama www.elections.ca adiga oo gujinaaya "Adeegga Macluumaadka Codbixiyaha" ("Voter Information Service").

Haddii aadan helin kaarkan, waxaa suurtagal ah inaad ku jirin liistada codbixiyeyaasha. Si aad isu diiwaangeliso, waxa aad u baahan tahay inaad samayso waxaa weeye oo keliya in aad tegtid meesha laga codeynaayo kuna taal xaafadda aad deggan tahay maalinta la codeynaayo, halkaasoo ay tahay lama dhaafaan inaad caddeyso aqoonsigaaga iyo cinwaankaaga.

Shuruucda cusub ee aqoonsiga ee aad ku codeyn karto.

Marka aad codeynayso, waxaa khasab ah inaad caddeyso aqoonsigaaga iyo cinwankaagaba.

Liistada waxyaabaha aqoonsi ahaan loo aqbali karo ee uu ansixiyay Sarkaalka Sare ee Kanada u qaabilsan doorashooyinka (Chief Electoral Officer of Canada), fadlan arag buug-yaraha aad boostada ka heshay ee ay kuu soo dirtay Elections Canada ama booqo www.elections.ca dabeetana guji "Aqoonsiga Codbixiyaha ee Meelaha Laga Codeynaayo" ("Voter Identification at the Polls").

Si aad u codeyso, waa inaad:

- Haysataa dhalashada Kanada
- Tahay qof ugu yaraan da'diisa tahay 18 sano maalinta doorashada
- Caddeyn karto aqoonsigaaga iyo cinwaankaagaba

Codkaaga dhiibo. Adduunkaaga muuq u samee.

www.elections.ca

1-800-INFO-VOTE

1-800-463-6868

lambaradani waa lacag la'aan Kanada gudaheeda iyo Mareykankaba, ama 001-800-514-6868, oo Meksiko (Mexico) gudaheeda lacag la'aan ah.



TTY 1-800-361-8935

ahna telefon loogu talo galay dadka dhegoolaha ah ama dhego-culus (aan hagaag wax u maqlaynin); lambarkanina waa bilaash Kanada gudaheeda ama Mareykankaba, ama 613-991-2082 oo meel kasta oo adduunka ka mid ah laga soo wici karo.

